

App-ka MySPPS

App-ka cusub ee MySPPS kala soco waxyaabaha ku soo kordha Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul. Waaxaad app-ka kala socon kartaa akhbaaraadka ku saabsan iskuulka uu ilmahaagu dhigto, macluumaadka basaska iskuullada, jadwalka ciyaaraha sportiga iyo waxyaabo kale. App-ka cusub ee "MySPPS" ka dhex-raadi kana soo dejiso app-ka MySPPS Google Play ama Apple App Store-ka.



App-ka MySPPS waxyaabaha uu leeyahay waxaa ka mid ah:

Warar Cusub Iyo Akhbaaraad

Waxaad app-ka ka haysaa wararka cusub, qaylodhaanno iyo walibo waxyaabaha ay iskullada ku soo qoraan bogagooda warbaahinta bulshada (facebook, twitter iwm.)



School Directory

Macluumaadka Sida Cinwaannada Iskuullada Iyo Khariiradaha (Maps)

Ma doonaysaa in aad booqatid iskuulka uu ilmahaagu dhigto? Hadaba waxaad app-ka cusub ka heli kartaa cinwaanka, barta internetka iyo walibo telefoonnada iyo email-lada shaqaalaha iskuulka.



Campus Portal

Akhbaaraad Ku Saabsan jadwalka Fasalka, imaatinka iskuulka, iyo Natijoooyinka ilmahaaga*

Waxaad la socon kartaa jadwalka Fasalka ee ilmahaaga, imaatinka iskuulka iyo natijada imtixaanada.



Schology

Koorsooyinka iyo Imtixaanada*

Waxaad eegi kartaa koorsooyinka ardaygaaga, natijoooyinka imtixaanadii la soo dhaafay.



Menus

Menu-ga Quraacda Iyo Qadada

Waxaad app-ka kala socon kartaa noocyada cunnada kala duwan ee ay ardaydu ku quraacanayaan ama ay ku qadaynayaan.



PayPams: Meal Payments

Lacagta Qadada Ee ilmahaaga Baaqiga U Ah*

Waxaad app-ka ka fiirin kartaa lacagta baaqiga u ah ilmahaaga waxaad sidoo kale app-ka u adeegsan kartaa bixinta lacagaha cunnada.



Athletics

Jadwalka Ciyaaraha

Waxaad app-ka ka ogaan kartaa natijada ciyaaraha, jadwalka iyo walibo ciyaaraha la joojiyay.



MySPPS Bus

Macluumaadka Ku Saabsan Basaska Iskuullada*

Waxaad app-ka ka ogaan kartaa in ay shirkadda basaska nagu soo war-galisay in baska uu ilmahaagu saaran yahay soo dhib-dhacayo iyo in kale.



Calendar

Jadwalka Maalmaha Iskuulka (Calendars)


App-ka waxaad ka raacan kartaa jadwalka maalmaha iskuulka si aad markaasi qorshahaaga oogu sii beegtid maalmaha uusan iskuul jirin.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan app-ka iskuullada ka eeg barta spps.org/MySPPS

Waxaa laga yaabaa in aad u baahato app kale oo aad lacag la'aan ooga soo rogan kartid app store-ka.


Qaabka Soo-rogashada app-ka MySPPS:

1




App-ka MySPPS ka soo rogo Google Play ama Apple App Store. Waxaad sidoo kale app-ka ka soo rogan kartaa barta internetka ee iskuulka. App store-ka ka dhex raadi app-ka “MySPPS”.

2



Fur app-ka “MySPPS” ka dibna liiska iskuullada ka dooro magaca iskuulka aad rabtid.


3



Settings

Tag qeybta “Settings” kadibna dooro qeybta iskuullada laga xusho ee “Follow schools.”

4



Dooro iskuulka aad rabtid ka dibna xulo qeybaha muhiimka kuu ah sida.

- Ogaysiisyo (Notifications): Hadii aad rabtid in fariimo lagu soo diro inbox-ka telefoonkaaga.
- Wararka (News): Si aad u heshid waxyaabaha ay iskuullada ku soo daabacaan bogagooda warbaahinta bulshada (facebook, twitter iwm.) iyo baraha internetka.
- Maqal iyo Muuqaal (Media) – Si aagd u heshid sawirro iyo video
- Kalandaariyaha (Calendar) – Si aad u heshid isbedelka jadowalka maalmaha iskuulka

Iminka way kuu idlaatay soo-rogashada app-ka cusub ee MySPPS. Adeegsi wacan!